# Fasaxa Shaqada: Jiro ama Geeri

Time Off from Work: Illness or Death

**COVID-19:** https://www.dol.gov/agencies/whd/fmla/pandemic.

## Sharciga Fasaxa Qoyska (FMLA)

FMLA waa sharci dowladda federaalku ay leedahay. Haddii aad xaq u leedahay (eeg qaybta xigta), waxa aad qaadan kartaa ilaa iyo 12-asbuuc oo arrin qoys ama caafimaad awgii laguu fasaxi karo iyadoon wax lacag ahi kuu socon muddo 12-bilood gudahood ah. Shaqadaada waa laguu heynayaa haddii aad qaadato fasaxa FMLA. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in shaqadaada dib laguugu soo celiyo ama lagu siiyo mid u dhiganta dhamaadka fasaxaaga FMLA.



Haddii uu kuu ururay fasax bukaan ama fasax caadi ah, waxa aad isticmaali kartaa mudada fasaxa FMLA. Waxaa laga yaabaa in madaxdaadu kugu khasbaan in aad isticmaasho. Mudada aad fasaxa ku jirto, ceymiskaaga caafimaadka waad heysaneysaa sidii adiga oo sheqeynaya oo kale. Waa in aad bixisaa lacagta bisha ee ceymiska.

## Ma ka soo baxay shuruudaha FMLA?

Si aad xaq ugu yeelato FMLA, waa:

1) U shaqeysaa loo shaqeeyaha sharcigu waajib kaga dhigayo fasaxa FMLA

2) In aad shaqeysay 1,250 saacadood 12ka bilood ee ka horeeya inta aanu fasaxa bilaaban.

3) In aad ka shaqeyso goob ay 50 ama wax ka badan oo shaqaale ah ka shaqeeyaan ama meel u jirta 75 mayl, oo aad

4) Aad ka shaqeysay goobtaas ugu yaraan 12 bilood.

## Waa maxay sababaha aan u isticmaali karo fasaxa FMLA?

Sababta aad fasaxa FMLA u codsaneyso waa in ay noqotaa sabab sharcigu ogol yahay, Taas waxaa ka mid ah mid kasta oo ka mid ah sababaha soo socda:

- Ma shaqeyn kartid xanuun aad u daran oo adiga ku haya darteed.
- Waxa aad u baahan tahay daaweyn xanuun aad u khatar ah oo ku haya.
- Waxa aad u baahan tahay in aad xanaaneyso waalid, ilmo, ama xaaas/say oo dhibaato caafimaad heyso.

## Maxaa la iga doonayaa in aan sameeyo si aan u codsado FMLA?



Waa in aad goobta shaqada siisaa 30 maalmood oo ogeysiis ah, haddii aad awoodo. Haddii aadan horey u wargelin, ogeysii sida ugu dhaqsaha badan. Waa in aad u sheegto goobta shaqada sababaha aad uga soo baxday shuruudaha FMLA. Kani waa xafiiskaaga shaqaada oo ogsoon in aad weydiisaneyso FMLA. Fasax bukaan oo a ad weydiisato kaliya kuma filna.

Loo shaqeeyaha waxa uu ku weydiiisan karaa cadeyn ku saabsan dhibaatada, sida cedyn uu soo qoro dhakhtarkaaga. Loo shaqeeyaha waxa uu la xiriiri karaa dhakhtarkaaga si uu hubiyo macluumaadka. Fasax kaama doonayaan si ay sidan u sameeyaan.

**Fiiro gaar ah:** xaaladda caafimaadku waa in ay noqotaa mid aad khatar u ah. Xaaladdu waa mid aad khatar u ah haddii uu tahay “xanuun, dhaawac, naafanimo ama xaalad kale oo jirka ama dhimirka ah oo u baahan in bukaanka la dhigo isbitaalka ama u baahan dhakhar inuu gacanta ku hayo”



## Maxaan yeelayaa haddii aanu loo shaqeeyaha ogolaan fasaxa?

Cabasho u soo gudbi Wasaaradda Shaqada ee Mareykanka, Qeyba Mushaharka Iyo Saacadaha Shaqada.
Ka soo wac 1-(866) 4USWAGE 1-(866- 487-9243).
Waxaa kale oo aad qabsan kartaa qareen si aad u diiwaangeliso dacwad.

## Dhimasho

FMLA wuu joogsanayaaba haddii qofkii xanuunsanaa uu geeriyoodo. Loo shaqeeyaha khasab kuma aha inuu fasaxa kuu siiyo dhimashada qofka qoyskaaga ka tirsan, laakiin waxaa laga yaabaa in loo shaqeeyuhu kuu ogolaado in aad fasax u qaado “fasaxa geerida.” Kala hadal ama akhri nidaamka u degsan loo shaqeeyaha.

Haddii adiga qof aad kuugu dhow oo qoyska ka tirsan ay la il daran yihiin xanuun aad u daran ama xaalad caafimaad oo dhimirka ah dhimashada qofkaas dartiis, waxaa suurogal ah in aad qaadan karto fasaxa FMLA. Laakiin xaaladda caadiga ah ee ka dhalata geerida kama mid ah waxyaabaha uu ogol yahay fasaxa MFLA.

## Minnesota waxa la Kasbadaa Waqti Jiro ama Amaanku

Waqtiga Jiradda iyo Amaanka ee la Kasbadaa waa fasax lacagtu kuu socoto oo ay shaqaddu khasab ay ku tahay inay ku siiso. Waa khasab in lacagtaaga caadiga ah ee aad ku shaqeyso aad hesho. Fasaxan lacagtu socoto waxa uu dhici karaa haddii:

- aad jirato
- aad u baahan tahay inaad daryeesho qof xigta ah oo xanuunsanaya

Waxa aad kasban 1-saac oo waqtiga xanuun ku maqnaanta ah 30 kii saacadood ee aad shaqeysaba. Waxa aad kasban kartaa ilaa iyo 48-saac sannad walba ama ka badan haddii shaqadaaddu ay rabto. Haddii magaaladda aad ka shaqeysaa ay leedahay sharciyo ilaalin ah oo kale, shaqaddu waa khasab in ay u hogaansanto sharciyadaa.

## Xaq ma leeyahay Fasaxa Jiradda iyo Amaanka La Kasbado ee Lacagtu kuu soconaysa ee Minnesota?

Xaq ayaad u leedahay fasaxa jiradda iyo amaanka ee lacagtu kuu soconayso haddii:

- Aad ugu yaraan 80-saac u shaqeysay qolo shaqo oo reer Minnesota ah aadana
- Aadan ahayn qandaraasle madax-banaan.



Xaq ayaad u leedahay fasaxaa xataa haddii aad tahay shaqaale ku meelgaar ah ama saacado yar shaqeeya. Fasaxan waxaa dhici karta in laga saamaxo heshiiska gorgortanka ee shaqaalaha iyo shaqadda ee shaqaalaha saraha iyo dhismaha.

## Su'aalo?

**MN Department of Labor and Industry**
*(Waaxda Shaqaalaha Iyo Warshadaha ee MN)*
www.dli.mn.gov
(651) 284-5005 ama
1-800-DIAL-DLI (1-800-342-5354)

**U.S Department of Labor**
*(Waaxda Shaqada Ee Mareykanka)*
www.dol.gov
1-866-4-USA-DOL 1-866-487-236

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**